

# ANTIBIYOOTIKA AANAY KU JIRIN

## Magaca:

Dhakhtaku waxa uu ogAADAY in jirada ku haysaa awgeed aadan u baahnayn antibiyootika. Warqadani waxay ku tusinaysaa mudada jiradu ku hayn karto, waxyabaha aad adigu samayn kartid si aad uga caafimaadid iyo xilgee ayaad marlabaad dhakhtar u tagi lahayd.

### Caabuqu wuxuu ku hayn karaa

- Caabuq dhagaha..... **4 maalmood**
- Caabuq dhuunt ah .. **7 maalmood**
- Hargab ..... **10 maalmood**
- Caabuqa daloolka lafaha sanka ..... **18 maalmood**
- Qufac/boronkiito... **21 maalmood**
- maalmo**

### Daawaynta

- Hubso inaad nasato
- Cabitaan badan
- Qandhadu waa calaamad lagu garto in jidhku iska difaacayo xanuunka kaas oo ugudanbayn baxa. Waxyad isticmaali kartaa paracetamol (ama ibuprofen) hadii adiga/ilmahaaga ay qandho qabato
- Fadlan waydii farmasiga daawo yaraynaysa xanuunka
- Ama wixii kale ee talo ah:

Isdaawaynta jidhku badanaaba waa isaga filan yahay inuu iska difaaco caabuqyada. Kolkaynu badsano isticmaalka

**Caabuqyada badankood ee** neefmireenda aaya ka baxa jidhka iyada oo aan la isticmaalin antibiyootiga.

**Antibiyootikada waxaa kor u kacaya** khatarta in bakhteeriyyadu isu bedesho mid u adkaysata antibiyootikada, taasoo keenikarta in ay tayo yeelan waydo daawada antibiyootikadu.

### Antibiyootikadu waxay keeni kartaa waxyeelo aan loo

**qasdin** sida finan ama canbaaro, calool xanuun, shuban, caabuq fungal ah ee hoosta (haweenka), dareen siyaado oo qorraxda ah iyo waxyeeloojin kale.

**Waligaa ha la wadaagin daawada antibiyootikada** ee laguu qoro dadka kale, dib ugu celi daawooyinka antibiyootiga ee aan la isticmaalin farmashiyaha si ay si habboon u tuuraan.



## Waa inaad dhakhsa ula xidhiidhaa dhakhtarka hadii:

- Madax xanuun xoog ah iyo dareen xannuun
- Maqaar qabaw oo qoyan ama finan aan caadi ahayn
- Jahwareer, lulmo-darrada ama dhibaatooyinka hadalka
- Neefsashada oo dhib ah
- Dibnaha buluugga noqda
- Xabad/laab xanuun
- Dhibaato liqidda
- Qufac dhiig wata
- Jahwareer badan oo ka yimid astaamahan



### Calaamadaha/Astaamahan aan khatarta lahayn waxaaad caadiyan la sugi kartaa ballan aad ka qabsato dhakhtarkaaga:

- Ma fiicna wakhtiga lagu qiyaasay
- Carruurta qaba caabuqa dhegaha: dhegaha dheecaan ka socdo ama maqalku dacifay
- Wax kale

Xaaladaha qaarkood waxaa laga yaabaa in ay adagtahay in la go'aamiyo in aad u baahan tahay antibiyootika. Kadibna dhakhtarku wuxuu dooran karaa inuu daawana kuu qoro kugulana taliyo inaad mudo dhowrtid xaalada xanuunka intaadan bilaabin daawada.

- Dhakhtarkaagu wuxuu ku siiyay sugitaan oo aad u kaadsato daawada laguu qoray ee antibiyootiga

Waa in aad dhowrto xaalada mudo gaadhaysa ..... maalmo

Hadii aadan ka raysan maalmaha soo socda, waa in aad bilawdo Daawada antibiyootikada.

Xaalado kale oo samayn kara in aad bilawdo daawaynta:

Hadii aad la kulanto jahwareer xoogan ama astaamo kale, kuwaas oo aynu kor kusoo xusnay baykaan, waa in aad dhakhtarka si degdeg ah ula xidhiidhaa- hadii aad bilawday daawada antibiyootiga iyo hadii kaleba.

